

ISU DIYAARINTA GUBASHADA KAYMAHA GURYAHA

Fact Sheet 2 – Community Risk Management. Revised 28/09/2004 – Somali

- NSW FIRE BRIGADES
- NSW RURAL FIRE SERVICE
- ACT FIRE BRIGADE
- ACT RURAL FIRE SERVICE

QORSHAHA BADBAADINTA GURIGAAGA: Diyaarinta gurigaaga xiliga kaymaha dabka

Haddii aad raacdo tilmaamahan fudud waxaad yarayn kartaa halista gubashada kaymaha ee saamayn kara gurigaaga :

- Ka nadiifi si joogto ah caleemaha dhulka, guryaha dushooda qasabadaha kuna xir qalbka biraha ah ee caleemaha ilaaliya.
- Ku xir shabag taar ah guriga dushiisa.
- Marka aad haanta gaasta ku xirayso guriga agtiis, hubi in badhada cadaadisku ay kor ujeedo si aanu ololku u jeedsanin dhinaca guriga.
- Ka fogee alwaaxda guriga meelana ku dad.
- Jar dhirta soo laalaada, cawskana gaagaabi iyo caleemaha dabku qabsan karo iyo jiridaha kana xaaq.
- Ha ku kaydinin haraaga dhirta, cawksa la jaray iwm gurigaaga dabdiisa meelaha dirta leh ee dawlada hoose ama meelaha kaymaha ah.
- Hubi in tuubada biyuhu gaari karto meesha mitirka biyuhu ku xiranyahay.
- Ku beer geedad iyo dhir yar yar oo aanu dabku si sahlan u qabsan Karin taas oo aad u fiirinayso hadba saliid ku jirta dhirtaasi ay u hoosayso.
- Haddii aad leedahay harada lagu dabaasho, ku dhaji calaamad muujinaysa biyaha xaydaanka hore . la xiriir dabdamiska xaafadaada wixii macluumaad dheeraad ah.
- Ka fakir inaad iibsato mishiinka bambka ah ee la qaadi karo si aad ugu isticmaashid haradaada iyo taangiga biyahaaga .
- Haddii uu jiro unuga dabdamiska bulshadu ama kooxda khubarada dabka, xubin ka noqo.
- Hubi in tuubooyinka dabka lagu damiyo ee gurigaagu inay meel haboon ku yaallaan ooaynay xanibnayn.

Xiliyada dabka kaymuhu ay halista ku yihiin gurigaaga:

- Kaymaha ha dhex gelin haddii uu qiiq jiro ama dab agtaada. Is daji una sheeg wixii dab ah lambarka 000!
- Hubi in jaarkaaga dad waayeela oo u baahan caawimo ay jiraan.
- Haddii ay suurta gal tahay xir biyo mareenada biyana ka buuxi.
- Haddii aad adigu goosato inaad meesha ka takto, mar hore samee.
- Haddii uu ku amro booliska NSW ama adeegga deg dega ah ee ACTgu inaad ka baxdo meesha waa inaad aqbashaa , markaas wixii xayawaan ah iyo alaabo qaaliya ururso oo isuna diyaari inaad takto.
- Xiro shaati gacmo dheera ah iyo surwaal, iyo kabo boodh ah oo xafidan.
- Xir daaqadaha iyo albaabada oodhan, ku gufee meelaha albaabada hoostooda ah tuwaalo ama bustayaal.
- Haddii uu dabku u soo dhowyahay guriga, soo qaado tuubada beerta iyo meesha ay ku xidhanto si aanay dabka ugu dhalaalin, waa intaas oo aad u baahataa mar kale.
- Si aad u caawiso inaad bakhtiiso meelaha yar yar ee dabku dhaafay, hayso tuubooyinka, sallaan, majarafado iyo baaldi biyo ah.
- Ku hayso toosh iyo raadiyaha yar ee la qaato guriga, haddii uu matalan ay korontadu bakhtido.

WIXII MACLUUMAAD DHEERAAD AH LA XIRIIR XARUNTA DABDAMISKA AMA ILAALINTA DABKA DEGMAADA AMA FIIRI WEBSITEKA

www.fire.nsw.gov.au www.rfs.nsw.gov.au ama www.esa.act.gov.au

XASUUSNOW

**DIYAAR GAROW
ISKA JIR
IS DAJI**

WIXII ARRIN DEGDEG AH TILIFOONI 000